

In ay la xisaabtamaan kuwa ay danaha kala dhexeeyaan, iyo guud ahaan bulshada, muhiimad weyn ayaa ay u leedahay CISP ka NGO ahaan. Shabakaddan *Shirarka Waxqabadka* waxaa ay qayb ka tahay dadaalladeenna aan ku wanaajineyno daahfurnaanteenna iyo xisaabtankeenna ee barnaamijyadeenna taageera dadka Soomaaliyeed.



Xisaabtan dhinacyo badan iyo cid keliya oo diiradda la saarayo: kuwaas oo ah dadka Soomaaliyeed

Xisaabtanka bulsho waxaa ka mid ah mas'uuliyadda lagu qaadayo tallaabooyin macno leh oo lagu wanaajinayo nolosha dadka saboolka ah. Isla waqtigaa, xisaabtanka bulsho waa ballanqaad ah in tallaabooyinka looga warbixinayo daneeyeyaasha kala duwan ee muhiimka ah. CISP waxaa ay ku talojirtaa in ay wanaajiso dadaalkeeda ku aaddan xisaabtanka, gaar ahaan in ay la xisaabtamaan dadka ay u adeegto: oo ah dadka Soomaaliyeed. Dhab ahaantii, CISP waxaa ay aqoonsan tahay in xisaabtan ay la xisaabtamaan ka-faa'iideystayaasha iyo la-hawlgalayaasha bulshada ka tirsan uu muhiim u yahay horumar dimuqraaddi ah oo laga

wada-qaybgalo. Haseyeeshee, ka-faa'iideystayaashu mar kasta kama faa'iideysan karaan macaamil toos ah oo ay la yeeshaan ururka, halka daneenayaasha kale (deeq-bixiyeyaasha, hay'adaha maalgelinta, NGO-yada kale iyo golayaasha hay'adda) ay heli karaan warar kale oo loogu talogaley (tusaale ahaan: warbixinno la siiyo, warar loo diro, shirar ay ka qaybglaan, iwm).

Xisaab-u-celinta ka-faa'iideystayaasha

Mid ka mid ah ujeeddooyinka shabakaddan *Shirarka Waxqabadka* waa in ay taageero ka geysato xisaabta CISP ay la xisaabtamayaan ka-faa'iideystayaasheeda. Arrintan daraaddeed ayaa qaybahan iyo hawlahaan soo socda loo diyaariyey:

1. [Wararka Hawsha](#) : waa qayb shabakadda *Shirarka Waxqabadka* ka mid ah oo bixineysa warar joogto ah oo ku saabsan dhammaan waxqabadyada (iyo baahiyaha) oo heer degaan, kuwaas oo ay ka mid yihiin sawirro iyo muuqaallo ku saabsan hawlaha CISP.



2. [Tarjumaad Af-Soomaali ah](#) : shabakaddan *Shirarka Waxqabadka* oo tarjuman ayaa la qaabeeyey si loo gaaro dadka Af-Soomaaliga ku hadla.

3. [Jawaab-celin](#) :waa qayb *Shirarka Waxqabadka* ku dhisan, oo loogu talogaley in si toos ah CISP loogu soo gudbiyo jawaab-celinta, cabashooyinka, dhaliilaha, filashooyinka ama wax-ku-biirinta kale.

4. [Kulamo Shirarka Waxqabadka oo la hago](#) : kulamo degaanka ka dhaca, oo loogu talogaley in dadka aan kombuyutarrada isticmaali karin ama aan heli karin *Shirarka Waxqabadka*

lagu ogeysiinayo hawlaha CISP, oo faallooyinkooda iyo talooyinkooda ay ku soo gudbiyaan. Waraaqaha jawaab-celinta waxaa laga heli karaa laguna buuxin karaa xafiisyada degaanka ee CISP.

5. [Nidaam SMS/teleefoon la soo waco](#) : waxaa jira lambarro teleefoon oo loo qoondeeyey oo

keliya in ay qaadaan cabashooyinka, dhaliilaha, filashooyinka iyo wax-ku-biirinta afka laga soo jeediyo iyo kuwa qoraal ahaan ay u soo gudbiyaan ka-faa'iideystayaasha aan heli karin *Shirarka Waxqabadka* oo aan ka qaybqaadan karin kulamada/shirarka.

Natiijada laga filayo in ay ka dhalato xisaabtanka bulsho ee



waxqabadka CISP

Natiijada laga filayo in dadaalkan xisaabtankan bulsho ay ka soo gaarto ka-faa'iideystayaasha iyo bulshooyinku waa:

1. **In uu kordho wacyiga** ka-faa'iideystayaasha iyo guud ahaan bulshada.
2. **In la dhiso awoodda ka-faa'iideystayaasha**, iyaga oo macluumaad la siinayo iyo iyada oo jawaab-celin habaysan laga helayo bulshada.
3. **In bulshada laga qaybgeliyo**: dadaallada oo noqda kuwo laga wada-qaybqaato kana jawaaba baahiyaha dadka, iyaga oo horumarinta si taabogal ah u wanaajinaya.